

## MACLUUMAAD KU SAABSAN KYKYVIISARI OO LOOGU TALA OGOLEY MACAAMIILK A IYO MACLUUMAADKAAS QARSOODIDEEDA

### MAXAA WAAYE KYKYVIISARI?

- Kykyviisari waa sahamin si fudud loo isticmaalo oo bixisa macluumaad ku saabsan awoodda aad u leedahay inaad shaqeyso oo aad shaqeyso.
- Waxaad uga jawaabi kartaa sahaminta warqad ama si elektaroonig ahaan.
- Waad buuxin kartaa sahaminta adiga oo kiligaaha ah ama qof kale oo kula joogo.
- Qofka kale wuxuu noqon karaa shaqaalahaaga ama qof aad jeceshahay.
- Markaad buuxiso ugu yaraan laba jeer, waxaa lagugu wargalin doonaa isbeddelada awoodaada shaqo.
- Kykyviisari waxay ku siin doontaa jawaab celin shaqsiyadeed iyo, haddii loo baahdo, waxay kuu soo jeedinaysaa ficillo dheeri ah si loo ilaaliyo ama loo wanaajiyo wanaagaaga
- Waxay kaa dhigeysaa xaaladaada mid muuqda, taasoo sahleysa inaad qorsheyso wadooyin kale.
- Ka jawaabida su'aalaha Kykyviisari waa ikhtiyaari.
- Kykyviisari waxaa lagu horumariyey ka mid noqoshada Bulshada iyo Isbeddelka Shaqada iyo Mashruuca iskuxirka Awoodda Waxqabadka (Solmu). Solmu waa mashruuc ay maalgeliso Sanduuqa Bulshada ee Yurub waxaana fuliya Machadka Caafimaadka Shaqada ee Finland (Työterveyslaitos).

### QARSOONIDA IYO KALSOONIDA KYKYVIISARI

- Kajawaabida Kykyviisari, qofku wuxuu oggol yahay isticmaalka xogta qaab aan la garanaynin howlaha cilmi baarista ee Machadka Qaranka ee Caafimaadka Shaqada.
- Looma baahna ogolaansho qoraal ah oo gaar ah.
- Kaliya hay'ada baaritaanka sameyneysa ayaa aqoonsiga adeega ku wehelinkarta shaqsiga. Työterveyslaitos ma aqoonsankarto qofka suaala ka jawaabey mana heleyso macluumaadka dadka.
- Machadka Qaranka ee Caafimaadka Shaqada wuxuu ilaaliyaa macluumaadka ay soo aruuriyaan wuxuuna u adeegsadaa howlahiisa cilmi baarista si aan shaqsi loo aqoonsan karin, xitaa si dadban.
- Machadka Qaranka ee Caafimaadka Shaqada waxey u dhiibikaraan macluumaadkan qarsoodiga ah dhinacyada saddexaad, tusaale ahaan cilmi baarista sayniska.